

FEMA waxey bixisaa Gargaar ka Shishe Dayactir Guri

Release Date: Aug 2, 2023

Milkiiliyaasha guri iyo kireystayaasha Vermont ee gobolada Caledonia, Chittenden, Lamoille, Orange, Orleans, Rutland, Washington, Windham iyo Windsor kuwaas oo saameysey duufaanaadii, daadkii, dhul-duragii iyo dhooqadii dhacday July 7 2023, ayna socota waxey u qalmi karaan deeqaha FEMA ee khasaaraha hanti shakhsiyeed iyo kharashaadyada kale ee u-qalma.

Barnaamijka Shakhsiyaadka iyo Qoysaska

Barnaamijka FEMA ee Shakhsiyaadka iyo Qoysaska (IHP) wuxuu siiyaa gargaar lacageed ama toos ah shakhsiyaadka iyo qoysaska u qalma kuwaas oo leh kharashaad lagama maarmaan ah iyo baahiyo daran oo aan la caymin ama si gaabis ah loo caymiyey duufaanaadii, daadkii, dhul-duragii iyo dhooqadii July awgeed. Tani waxaa kujira gargaar ka shishe dayactir guri.

Cadadka iyo nooca gargaar waxaa go'aamiya kharashaadkaaga, waxaana kujiri kara:

- Kharashaadka Caafimaad iyo Ilko
- Gargaar Daryeel Caruur
- Gargaar Sheeyo Kala-duwan
- Gargaar Guuris iyo Keydin
- Gargaar Tacsii

Noocyada kale ee gargaar waxaa la bixin karayaa oo qura haddii ka-badbaadaha uu ka codsado deyn musiibo Maamulka Ganacsi Yar ee Mareykanka (SBA), una qalmi waayo. Buuxinta codsiga micnaheedu ma ahan inay tahay inaad aqbasho deyn. Gargaarka dheeriga ah ee diyaar ahaan kara waxaa ku jiri kara:

- Gargaar Hanti Shakhsiyeed
- Gargaar Gaadiid



FEMA

- Siyaasad Caymis Daad ee Koox (GFIP)

Kala hadal takhasusyahan FEMA ah si aad wax badan u barato.

Takhasusyahanada FEMA waxey diyaar ku yihiin taleefonka **800-621-3362** ama waji-ka-waji ee Goobaha Kasoo-kabashada Musiibo. Si aad u ogaatid xarunta kuugu soo sokeysa, booqo [fema.gov/drc](https://www.fema.gov/drc).

Shuruudaha Guud ee Barnaamij

Guud ahaan, codsadyaashu waa iney kasoo baxaan dhammaan shuruudaha soo socda si ay u codsadaan:

- Adiga ama qof la nool muwaadin Mareykan ah, jinsiyada wadani ahayn, ama ajaanib u-qalma.
- Ka gudubtaa xaqiijinta aqoonsi iyo degenaansho ee FEMA.
- Waa inaad ka gudubtaa xaqiijinta lahaansho ee Gargaar Dayactir Guri ama Bedelid Guri.
- Deegaankaaga aasaasiga ah waa inuu yahay goob xeer madaxweyne loogu dhawaaqay musiiibo ayna tahay meel lagu noolaan karin ama marin lahayn.
- Ama ma lihid caymis, ama waxaad buuxisey caymis mana daboosho dhammaan khasaarahaada.

Codso Gargaarka FEMA

Ka codso onleenka [DisasterAssistance.gov](https://www.DisasterAssistance.gov), lasoo dag [apka moobeelka FEMA](#) aaladaha taleefonka, ama ka wac leenka-caawinta bilaashka ah ee **800-621-3362**. Waxaa diyaar ah fasiraad luuqad. Haddii aad isticmaashid adeeg isku-duwid muuqaal (VRS), adeeg taleefon ee qoraal leh ama waxkale, usii FEMA lambarkaada adeegaas markaad codsanaysid.

Muuqaal gelitaan ee sida loo codsado gargaar FEMA ku saabsan, aad [FEMA la heli karo: Saddex Qaabab ee La Iskugu Diiwaangeliyo Gargaar Musiibo ee FEMA YouTube](#).

Macaluumaadkii ugu dambeeyey ka booqo [fema.gov/disaster/4720](https://www.fema.gov/disaster/4720). Kala soco Twitter-ka koontada 1 Gobolka ee FEMA twitter.com/FEMARegion1 ama bogga Facebook-ga FEMA [facebook.com/FEMA](https://www.facebook.com/FEMA).



FEMA

Wixii u dambeeyey ee jawaab-celinta iyo kasoo-kabashada Vermont, kala soco Hay'adda Maareynta Arrimaha Degdega ah ee Vermont twitter.com/vemvt ee Twitter iyo Facebook facebook.com/vermontemergencymanagement.

FEAM waxaa ka go'an inay xaqiijiso gargaar musiibo ay weheliso sinnaan, takoor la'aan si ku salaaysan midab, kalar, diin, dhalasho, jinsi, da', naafanimi, garashada Ingiriiska, ama xaalad dhaqaale. Ka badbaade kasta ee musiibada ama xubin bulshada ah ayaa lasoo xiriiri karta Xafiiska Xuquuqda Rayidka ee FEMA haddii ay dareemaan iney yihiin dhibane takoor. Xafiiska Xuquuqda Rayidka ee FEMA waxaa lagala soo xiriiri karaa si bilaash ah 833-285-7448. Waxaa diyaar ah hawlwadeeno dhowr luuqadood ku hadla.



FEMA